# DUURJOOG BAA HALKAAN KU NOOL

*Dhul-dhireedkaan waa deegaankii asalka ahaa iyo hoyga xayawaanno badan, oo ay ku jiraan madax-kuti madow, kuugar, bisad-duur, yeey-calaan (coyote) iyo dabacaddeeye. Xayawaannadaan waxay ka ciyaaraan kaalin muhiim ah nidaamyada bey'ada maxalligaa. Waxaan maskaxda ku hayn karnaa saameeynteena guryahooda annakoo qaadeyna tillaabooyinkaan fudud si aan ku taageerno nabadgelyada iyo noolal-wanaagga duurjoogta iyo dadka.*



## HA QUUDIN DUURJOOGTA — SI KAS AH AMA SI KALABA

- Gudaha ku hay haamaha qashinka iyo qashinka la bacramin karo illaa subaxa qaadista; isticmaal haamaha iska-caabinta duurjoogta.
- Gudaha ku quudi rabaayadaha oo gudaha ku keydi cuntooyinka rabaayadaha.
- Nadiifi haraaga cuntada kadib cunta-cunista banaanka.
- Nadiif ka dhig qalabka hilibka lagu shiilo ee bannaanka.
- Beer dhir dhalad ah si shimbiruhu cunto uga helaan, beddelka suridda quudiye-shimbireed.
- Xero-geli rasada la-bacramin karo, geedaha miraha, guryaha shinnida, iyo waababka digaaga.

## ILAALI NABADGELYADA RABAAYADAHA IYO DUURJOOGTA

- Rabaayadaha xarig ku hay markay bannaanka kula joogaan si looga hortago iskudhac suurtogal ah.
- Bisadaha gudaha ku hay illaa ay ku jiraan meel bannaan xiran, sida "shabaq" mooyaane.
- Eyda ku ilaali aag xiran, sida guri-ey, ama ilaalintaada ha ku jiraan markii deyr bannaan la joogo.
- Masaafo ammaan ah u jirso duurjoogta. Suulkaaga kor u qabo, gacantaada si buuxda u kala bixi, oo isku-qabo hal il — haddii suulkaagu daboolo xayawaanka oo dhan, hadaba waxaa joogtaa masaafo ammaan ah!



*Ilmo Bisad-duur. Sawir bulsho oo Carnivore Spotter lagula wadaagay www.carnivorespotter.org*

## BEY'AD-WADAAGGU WAA DADAAL BULSHO!

Tilloobooyinkaan waxay ugu waxtar badnaan doonaan markii aan kulligeen wada-shaqeyno. Fadlan iskaashi la samee deriskaaga si aad ugu caawiso bulshadaada in ay duurjoogta bey'adda la wadaagto! e!

***Deriskaaga la wadaag farriimaha bey'ad wadaagga adoo isticmaalaya xirmada macluumaadka baraha bulshada ee DUURJOOG BAA HALKAAN KU NOOL!***

WOODLAND PARK ZOO

Washington Department of FISH & WILDLIFE